


# Raabiyada

Xaashida xaqiiqada



Raabiyadu waa fayras saameeya maskaxda iyo laf dhabarta. Raabiyada ku dhacda dadka ayaa dhif ku ah Maraykanka, laakiin wuxuu ku badan yahay xayawaannada duur joogta ah ee Maine. Fayraska raabiyada waxaa laga helaa calyada, maskaxda, iyo laf dhabarta xayawaannada uu ku dhaco.



Dhammaan xayawaannada naasleyda ah, ama xayawaannada leh cadhada soo saarta caanaha, ayaa qaadi kara raabiyada. Xayawaannada qaar sida bahal higlada, dawacada, weerka, iyo kabaliga ayaa caan ku ah faafinta raabiyada. Raabiyada ayaa ku yar cayayaanka yaryar, rabaayada la talaalay, iyo xoolaha la dhaqdo.

## Astaamaha iyo Calaamadaha



Qandho




Madax-xanuun



Daal aad u badan

Calaamadaha hore ee raabiyada ku dhacda dadka waxaa sidoo kale ku jiri karta fakar aan qeexnayn iyo walaac. Marka qofka qaba raabiyadu bilaabo inuu yeesho calaamadaha, caadiyan wuu dhintaa. Inta badan dadka ayaa bilaaba muujinta calaamadaha raabiyada hal ilaa sadex bilood gudahood kadib markuu ku dhaco haddii aysan helin daawayn ku haboon.

**Xayawaannada:** Xayawaannada qaba raabiyada ayaa u muuqan kara kuwo xishoonaaya, cabsanaaya, malduunsan ama u muuqda sida wax cabsan, xaasid ah, arxan daran, ama aad saaxiibtinimo u leh. Xayawaannada qaba raabiyada ayaa caadiyan u dhaqma si qariib ah marka fayrasku gaaro maskaxdooda, laakiin calaamadaha ayaa kaladuwanaa kara. Kuma ogaan kartid keliya inaad eegto xayawaanka inuu qabo raabiyo. Waxay qaadan kartaa labo asbuuc ilaa afar bilood in biisada reerka la joogta ama eey uu yeesho astaamaha raabiyada kadib markuu ku dhaco cudurku. Lama yaqaan mudada ay qaadato in xayawaanka duur joogta ah yeeshaan calaamadaha cudurka.



Raabiyadu wuxuu faafaa marka xayawaanka fayraska qaba uu qaniino ama xagto qof kale ama xayawaan kale. Fayraska ayaa sidoo kale faafi kara haddii calyada ama cadka maskaxda ama araxda xayawaanka fayraska qaba ay galaan maqaar dhaawac ah ama afka, sanko, ama indhaha qofka.



Shaybaadhka caafimaadka dadwaynaha ee gobalka ee ku yaal Augusta ayaa baari unugyada maskaxda xayawaanka si loo ogaado inuu qabo raabiyo. Xaalada ay xayawaanku la joogaan dadka, CDC da Maine iyo Xakamaynta Xayawaanka Deegaanka ayaa go'aamin doona jawaabta habboon iyo talaabooyin xakamaynta.

# Waxa aad Samaynayso Haddii Adigga ama Xayawaankaaga Rabaayada ah Aad La joogtaan Xayawaanka Qaba Raabiyada

Haddii adigga ama xayawaankaaga rabaayadu uu la joogo xayawaan duurjoog ah ama xayawaan aadan aqoon, waa inaad:



- Si adag boogta ugu nadiifisaa saabuun iyo biyo



- Wacdaa dhakhtarkaaga. Wuxuu kaa caawin karaa go'aaminta haddii aad u baahan tahay daawayn.
- Wac Sarkaalka Xakamaynta Xayawaanka ee magaaladaada (ACO) haddii xayawaanka weerarka gaystay yahay biisad ama eey \*
- Wac Madaxa Duurjoogta ee Deegaankaaga haddii xayawaanka ku weeraray ahaa mid duur joog ah. \*\*
- Wac dhakhtarkaaga xoolaha iyo ACO ga deegaankaaga haddii xayawaankaaga rabaayada ah ku taalo qaniinyo ama xagtin uu gaystay xayawaan.

\*Kala xariir ACO adoo wacaaya xafiiska magaalada ama booliiska deegaanka/gobalka.

\*\*La xariir Madaxa Duurjoogta adoo wacaaya booliiska gobalka ama xarunta kuugu dhow ee wicitaannada.

## Daawaynta Dadka



Daawaynta dadka qaba raabiyada ayaa ah iskudarka talaalka raabiyada iyo cirbadaha immunoglobulin (RIG). Tan waxaa loogu yeeraa "daawaynta ka hortagga kadib qaadista" ama PEP.

ACO yada, dhakhaatiirta xoolaha iyo kaaliyaashooda, iyo dadka kale ee sida joogtada ah ula falgala xayawaannada rabaayada ah ama kuwa duur joogtada ah waa inay qaataan talaalka qaadista kahor ee raabiyada.


## Kahortag Raabiyada



Xaqiiji in xayawaankaaga rabaayadu talaalan yahay. Sharciyan, dhammaan eeyada iyo biisadaha waa in la talaalaa kadib markay gaaraan da' gaar ah.



Iska ilaali la joogista dhammaan xayawaannada iyo xayawaan kasta oo aadan aqoon. Ha taaban hayawaannada jiran ama waxyeeladu gaartay ee duur joogta ah.



Adkee daboolka qasacyada qashinka hana dhigin cuntada xayawaanka rabaayada ah banaanka. Tani waxay xayawaannada ka hor istaagaysaa inay gurigaaga yimaadaan.



Kala hadal farsamo yaqaanka guryaha ama qandaraasle inuu gurigaaga ka dhigo "mid aan kabaligu soo geli karin".

## Lambarada Taleefanka Muhiimka ah

- Soo sheegida Cudurka iyo Talo Bixinta CDC da Maine: (800) 821-5821
- Shaybaadhka Baarista Caafimaadka iyo Bii'ada: (207) 287-2727
- Dhakhtarka Xoolaha ee Gobalka: (207) 287-3701

Xarumaha wicitaanka duur joogta (oo furan 24/7):

- Augusta: (800) 452-4664
- Bangor: (800) 432-7381
- Houlton: (800) 924-2261

Waxaad sidoo kale booqan kartaa [www.maine.gov/dhhs/rabies](http://www.maine.gov/dhhs/rabies) si aad u hesho xog dheeraad ah.